

Gacaliye Waalid/Ilma haye:

Dugsiga _____ wuxuu maalin kasta bixiyaa cunto cafimaad leh. Caruurta waxay ku iibsanaa karaan qadada _____ iyo quraacda _____. Caruurta biixiya shuruudaha ogolaanshaha ay dhigto Wasaarada Beeraha ee U. S. waxay heli karaan cunto bilaash ah ama la jebiyay, qiimaha _____ qado iyo _____ quraac. Cuntada la bixinayo oo dhani waa in ay buuxisaa shuruudaha cuntada ee caafimaad ee ya dhigtay Wasaarada Beeraha. Haddii uu ilmo yahay naafo, oo uu dhaktar gooyey, oo ay taasi ka joojinayso in uu cuno cuntada iskuulka, dugsigu waa in uu ugu bedelaa ta uu dhaktaku u qoray. Haddii loo baahdo cuntadaa garrka ah, lacag siyaada ah lagama bixinayo cuntada. Laakiin ogsoonow, in aanu dugsigu ahayn in uu bixiyo conto gaar ah dadka xasaasiyada le ama alargiska, iyadoo aanay naafo qofka ka dhigayn. Fadlan, dugsiga la xidhiidh wixii fahfaahin kale.

Ilmahaagu wuxuu helayaa cunto bilaash ah haddii aad qaadata warqada gargaarka cuntada, Gargaarka Ku Meel Gaadhka ee Qoysaska Baahan (TANF) ama Gargaarka Cunta dib u Bixinta ee Xeryaha Hindida Maraykanka (FDPIR). Haddii uu dakhligaagu la mid yahay ama ka hooseeyo inta jadowalka ku taal, ilmahaagu wuxuu heli karaa cunto bilaash ah ama qiimo jaban.

Sidee baan ugu helaa ilmahaaga cuntada dugsiga ee bilaashka ah ama giimaha jaban? Waa in aad buuxisaa Warqada Gargaarka Cuntada oo u soo celisaa dugsiga.

- **Qoysaska qaata warqada gargaarka cuntada, Gargaarka Ku Meel Gaadhka ee qoysaska Baahan (TANF) ama Gargaarka Cunta dib u Bixinta ee Xeryaha Hindida Maraykanka (FDPIR).** Waxaad keliya ee u baahan tahay in aad ku buuxisid ilmahaaga magaciisa iyo lambarka galkiisa, qof qaangaadhihina waa in uu saxeexaa warqada.
- **Qoysaska aan qaadan warqada gargaarka cuntada, Gargaarka Ku Meel Gaadhka ee qoysaska Baahan (TANF) ama Gargaarka Cunta dib u Bixinta ee Xeryaha Hindida Maraykanka (FDPIR).** Haddii aanad haysan lambarkaa, waa in aad soo raacisaa dadka qoyskaaga magacyadooda oo dhan, dakhliga qofkasta soo galay bishii soo dhaaftay, halee buu dakhligaasi ka soo galy. Qof qaangaadha oo qoyska ka mid ahi waa in uu saxeexo warqada kuna qoro lambarkiisa nabadgelyada bulshada, ama waa in uu sheego in aanu lahayn.
- **Qoysaska gurigooda caruur aanay dhalin ku koriya.** Waa in aad soo raacisaa ilmaha magaciisa iyo “shakhsi ahaan” waxa uu u isticmaalo dakhliga ilmaha soo galay bishii ugu danbaysay, qof qaangadhina waa in uu warqada saxeexaa.

Miyaa warada la hubinayaa? In aad shuruudaha buuxisid waxa laga yaabaa in la soo hubiyo mar ka mid ah inta sanad dugsiyeedka. Maamulka Dugsiga ayaa laga yaabaa in ay warqad kuu soo qoraan waxa cadaynaya in uu ilmahaagu buuxiyo shuruudaha oo u qalmo in uu helo cuntada bilaashka ah.

Miyaan Goanka dugsiga ka doodi karaa? Maamulka dugsiga ayaad la hadli kartaa haddii aad ka soo horjeedo go'aanka dugsiga. Waxad codsankartaa dhegaysi cadaalad ku dhisan hadaad la soo hadashid ama u soo qortid:

_____ Taleefan: _____
Cinwaanka: _____

Ma in aan soo sheegaa baa isbed haduu dhaco? Haddii uu ilmahaagu helo bilaash ama cuntada qiimaha rakhiiska ah waa in aad dugsiga caruurtaada la socodsiiid marka ay ku korodho in ka badan \$50 bishii 600 sanadkii lacagta ku soo gasha ama qoyskaaga tiradiisu hoos u dhacdo. Haddii uu ilmahaagu ku

helo cuntada sabtoo ah waxaad qaadataa gargaarka cuntada waa in aad nala socodsiisid haddii aanad qaadan gargaarka.

Wixii warbixin ah ee layga uruuriyo miyaa cid kale ogaanyasaa/qarsoodi noqonaysaa? Wixii warbixin ah ee aad noo soo gudbiso waaxay nagu caawinaysaa in aanu go'aan ka gaadhno in uu ilmahaagu u qalmo in uu helo cuntada bilaashka ah ama ta qiimaha jaban. Waxa laga yaabaa in aanu la wadaagno dadka masuulka ka ah barnaamijyada kale ee cuntada nafaqada leh, caafimaadka ama waxbarashada si ay kuu geliyaan barnaamijyadaa, waxa kalee lagu miisani karaa barnaamijyadaa.

Sidee baan hadhow u codsadaa cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban? Inta dugsi furanyahay wakhtigaad rabto waad codsankartaa cuntada. Haddii aanad hada buuxin shuruudaha ogolaanshaha lakiin ay xaaladaadu isbedesho, sida dakhliga qoyska oo hoos u dhaca ama tirada qoyska oo kor u kacda amaba see haddii ay shaqo la'aani kugu dhacdo, ama aad kaadhka cunada lagu helo TANF ama aad hesho FDPIR, buuxi warqada markaa.

Waanu kula socodsiinaynaa haddii lagu ogolaado ama lagu diido.

Si kalgacal leh,